



Waxbarashada kaalmada iyo xananeynta ee Gurugafarsamada

Shaqada kaalmada iyo xananeynta

Waxbarashada xanaanada iyo kaalmada ee lagu dhigo Guriga farsamada (Taitotalo) waxa uu ku siinaya fursad aad ku shaqeyn kartid guud ahaan waayelada xananoyinkooda, oo leh fursado fiican sida aad shaqo ku heli laheyd. Kaalmeynta iyo xananeyntu waa shaqooyin ku saabsan kaalmoyin kala duwan, tusaale ahaan waxa aad ku kaalmeyneysaa sida raashin cunida, qubeyska ama labiska oo kale. Kaalmada xananeyntu waa in aad masuul iska saarta macmiilada meesha dagan iyo meesha ay daganyihiin. Shaqada waa in la tixgaliyaa caafimaadka macmiillada iyo wakhtigooda.

Waxa lagaa rabo

Waxbarashada xananeynta iyo kaalmada waxa lagaa rabaa in aad taqanid luqada af finishka in kugu filan, tabar kugu filan iyo dulqaad badan. Waa in aad diyaar u ahaata dad kala duwan in aad la shaqeyn kartid iyo in aad qaadan kartid talaalada aad u baahantahay. Inta ay wax barashadu kuu socoto waa in aad fursad u heshid isticmaalka kompiuterka iyo aad diyar u tahay in aad shaqeyn kartid galinka dambe iyo sabtida iyo axadaba (weekend) inta aad ka shaqenesid howlahan oo kale.

Waxbarashada

Waxbarasha kaalmada iyo xananeyntu waxa ay ka kala kooban tahay soshalka iyo caafimadka oo loo yaqaano lahihoitaja. Casharadu waa labo qeybood (60qd)

Haddii aad rabtid in aad sii wadatid wax barashada, waxa aad codsan kartaa Guriga farsamad (Taitotalo) waxbarashada soshalka iyo caafimaadka uu soo bandhigo sida aad ku noqon laheyd kalkaaliso.

Waxbarashadu waxa ay soconaysa 10-14 bilood

Guriga farsamada (Taitotalo) waxa uu fursad kuu siinaya in aad waxbarashada xananeynta iyo kalkaalinta in aad ku

qaadatid casharada skoolka maalinki ama waxbarashada shaqynta.

Waxbarashada shaqeynta waxa aad u baahantahay in aad heshid meel lagu qabto shaqoyinka kaalmada iyo xananeynta oo aad markaa heshiis shaqobarasho ah la saxeexda. Shaqobarashada waa in aad isku xidhaa waxbarashii iyo shaqadii guud.

Waxbarasha maalinki casharado badan waxa lagu qaadan doona meelaha shaqooyinka. Waxa kale oo la socda casharada qaar in aad fasalka ku qaadatid qaarna si maqnaasho ah aad ku qaadan kartid. Wax barashada maalinki waa mid aad si madax banaan aad u dhiganesid oo waxa aad xaq u leedahay in aad codsatid kaalmada waxbarashada (opintotuki)

Waxbarashadu waa bilaash e lakin shaqsiya waa in uu isagu iska kabaa qalimanta, buugaga iyo wixi lamid ah ee uu casharada ku dhigan lahaa.

Waxbarashada xananada iyo kaalmada ee Guriga farsamada (Taitotalo)

Waxbarashada xananada iyo kaalmada ee Guriga farsamada lagu dhigo waxa uu fursad kuu siinayaa in lagaa dhiso xaga aqoonta iyo farsamada kugu filan sida aad uga shaqn lahed shaqooyinka ku saabsan xananeynta iyo kalkaalinta. Kaso qeyb gal xananeynta iyo kalkaalinta, gacmo furan iyo si dhiiranba waa lagu soo dhaweynayaa sida aad ku heli lahed farsamo kugu filan ood mustaqbaalkaga ku dhisi lahed.

taitotalo.fi/hoiva-avustaja



IO
T
A
T

TAITOTALO

TAITOTALO - INNOSTUKSESTA OSAAMISEEN

Valimotie 8, 00380 Helsinki
asiakaspalvelu@taitotalo.fi
www.taitotalo.fi

Rahoittaja
Jatkuvan oppimisen ja
työllisyyden palvelukeskus

9/2023